

LANCASTER WEST

MACLUUMAADKA CUSUB EE

Xagaaga 2020

Soomaali

Mid kamid ah basaskeena caasiga ah ee laydhka ah



Yarayn CO₂



Hawsha LancWest ee

la dagaalanka xaalada degdeg ah ee cimilada

Lancaster West Estate waxa ay doonaysaa inay noqoto meel uu kaarboonku ku yar yahay guro ah marka la gaadho 2030, iyada oo la xaqiijinayo jiritaanka iyo wax ku oolnimada tamarta ee halbawlaha u ah habaynta qarniga 21aad ee bilaha iyo sanadaha soo socda.

Tani waxay ka danbeysay dadaalkii uu sameeyay horaanka sanadkan markii la bayaamiyay xaalada degdeg ah ee cimilada, wada shaqaynta dadka deegaanka ee samaynta nidaamka mudnaanta, iyo ka wada hadalka dhamaan heerarka dawlada si loo xaqiijiyo in Lancaster West ay u noqoto tusaale ay kuwa kale ku daydaan.

Iyada oo haboonaantu uu u yahay halbawle habaynta, waxa aanu xaqiijinaynaa in guryuhu ay diiran yihiin oo ay raaxo u leeyihiin dadka deegaanka, in la yareeyo

kharashka tamarta oo waxaa la siiyaa qiime sare, sidoo kale waxaa lagu xaqiijiyaa in mashaariicda yaraynta wasakhda ee deegaankeena balaadhan iyo yaraynta saamaynta isbadalka cimilada. James Caspell, Maamulaha Jaarka ayaa yidhi: "Dib u habaynta hantida oo dhan ee soo socda waxa weeye fursad hal mar ah jiilkiiba oo lagu xaqiijinayo in aanu hormar ku samayno wax ku oolnimada kaarboonka ee hantida iyo in dhaxal looga tago kaas oo dadka iyo dhulkaga dhaqaalaynaya. Waxa weeye wax ay dadka deegaanku si kordhaysa waxay

inaga dalbadeen in aanu tix gelin samayno."

"Waxa aanu kala shaqaynaynaa kooxaha dawlada hoose oo dhan, iyo sidoo kale Duqa London Deeqda Lacagta Isku Filnaanshaha Taarta, ee Waaxda Ganacsiga, Tamarta iyo Khidada Warshadaha, iyo Midawga Yurub, inay baadhaan fursado maal galin iyo macquuliyada teknooloojiyad deegaanka u wanaagsan in lagu sameeyo qaab oo lagu sameeyo habaynta."

Waxa aanu hore u samaynay dhawr hormar oo gurbayn ah iyo qaabna aanu u shaqaynayno ee aanu ku yaraynayno kharashka dadka deegaanka ah iyo wasakhda kaarboonka. Waxa aad macluumaad badan ka akhriyi kartaa hormarka aanu ka samaynay wargeyskan!

Sanadka soo socda, iyada oo la qaadayo talaabooyin aanu hore u samaynay, waxa aanu hore ula soconay sidii loo kaydin lahaa:



30,300 kg

oo CO₂ wasakh ah oo ka yimaadaa ee hawada sare



1.5 milyan

litirada biyaha gala

**LANCASTER WEST
NEIGHBOURHOOD TEAM**

WT11



THE ROYAL BOROUGH OF
KENSINGTON
AND CHELSEA



Qaababka nooloolasoo xidhiidhi karo anaka, u wareeg boga danba

Majaladadani waxa ay burburaysaa 100%

Mudnaanta dib u habaynta - iminka waa la dhamaystiray!

Dib u habayn. Codkaaga. Tobankaaga ikhtiyaar ee ugu sareeya.

10 mudnaan ee ugu sareeya dadka deegaanka Lancaster West ee dib u habaynta ah waa la bilaabay. Sagaalkii bilood ee lasoo dhaafay kooxdeenu waxay kala shaqaysay dadka deegaanka ee sakad kasta ee hantida oo dhan ah sidii ay u sheegi lahaayeen tobankooda mudnaanoood ee ugu sareeya ee dib u habaynta ee sakad kasta iyo gurigaaga, taas oo ku salaysan miisaaniyada la heley iyo kharashkii ugu danbeeyay.

Waxa aanu samaynay munaasabad Guri Furan ah, Aqoon Iswaydaarsiga Mudnaanta, booqasho guri, xog uruurin online ah, soo dhigid baraha bulshada ah iyo in taleefanka la iskula soo hadlo si loogula socdo dad badan oo deegaanka ah oo aan la gaadhin ilaa inta macquulka ah. Waxa nala siiyay jawaabo cajiib ah. Sakadaha qaar wax ka badan 80% dadka deegaanka ayaa la shaqeeyay barnaamijyada dib u habaynta soo socda. Maadaama oo boqolaal idinka mid ahi ay gelin shaqeeyaan.

Waxaad ka heli kartaa gudiyaada sakad kasta Instagram iyo sabuurada hantida oo dhan taal, iyo sidoo kale app-la iyo daaqada Hoosta. Waxa aanu doonaynaa in aanu mudnaanta siino-inaka oo wada jirna xog uruurinta iyo siday macquulka u tahay daraasada in la sameeyo 2020 - si loo qaabeeyo barnaamijyada dib u habaynta sakadaha ee gaarka ah ee lagu qaadhayo hanti tusaale ah qarniga 21aad.



Wajiga xiga - Faahfaahinta nashqada

Jawaab celinta dadka deegaanka ayaa hagi doona faahfaahinta nashqada wajiga iminka socda. Waxa aad ku arko doonaa xog uruurin qaadayaal iyo nashqadeeyayaal hantida, waxa aad sawiri doontaa farsamo si loo xaqiijiyo in dib u habaynta ay ku jiraan dadka deegaanka rabitaankoodu iyo in lagu bixiyo sida ugu saraysa ee macquulka ah.

Waxa aanu soo saari karnaa ikhtiyaarka qaabka, alaabaadka lagu rakibayo iyo kuwa lagu xidhayo ee aynu u isticmaali karo dadkeena deegaanka ee bilaha soo socda si loogu bixiyo dib u habaynta taas oo ku salaysan waxa aad noo sheegtey inaad doorbido. Waxaa taas kamid ah waxyaabaha sida midabka madbakha, nooca dhulka, ikhtiyaarka laydhka iyo ikhtiyaaraadka agabka. Waxa aad kala tashan doontaa dadka deegaanka sidii loosoo afmeeri lahaa ikhtiyaaraadkan.

Badanaa shaqada dib u habaynta sakad-sakad waxay bilaabi doontaa Dayrta 2021, in kasta oo aanu filayno inay barnaamijyada socdaan ee dib u habaynta ahi intii wixii ka horeeya.

Wargeyskaaga. Aragtiyahaaga



Waxa aanu u baahanahay caawimadaada. Buuxi xog uruurinta

Waxa aanu naga caawisaa hormarka sida aanu ula xidhiidhno dadka deegaanka ah. Waxa aad siisaa dhan daqiiqo si aad u buuxiso xog uruurinta lifaaqaha ah oo waxa aad noo sheegtaa waxa aad u aragto xidhiidhka aad anaka naga heshey, oo waxa aad sheegtaa qaab aanu ku hormarin karno taas. Waxa aad usoo dirtaa dib xog uruurinta adiga oo isticmaalaya bushqada lacagteeda hore loo bixiyay. Waxaa jira £20 fagtuur ah oo aad ku guulaysan karto. **Fadlan la hadal 0800 389 2005 hadii aad u baahan tahay in lagaa caawiyo buuxinta xog uruurinta.**

Sida nooloola soo xidhiidhi karo



Unit 7, Baseline Studios,
Whitchurch Road, W11 4AT



limeel lancasterwestoffice@
rbkc.gov.uk



Hadii aad doonayso inaad la
hadasho, fadlan lasoo hadal
0800 389 2005



Nagala soco @lancasterwest
neighbourhoodteam



Saacada furan ee Isniintan
ilaa Jimcaha, 9 subaxnimo
ilaa 5.30 habeenimo



Soo dejiso app-keena cusub
WeAreW11

